SC

**REPUBLIC OF** **SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/WM/240-2909/012015

DATE 11/01/15

# XEER MADAXWEYNE Lr.0415/012015

## Xeerka Guddida (Komishanka) Qaranka Ee Xakamaynta AIDS-ka Xeer Lr. 67/2014

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr. GW/G/KF-26/645/2014 ee ku taariikhaysan 05/01/2015 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Guddida (Komishanka) Qaranka Ee Xakamaynta AIDS-ka Xeer Lr. 67/2014.

<u>Wuxuu Soo Saaray</u>

Xeerkan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Guddida (Komishanka) Qaranka Ee Xakamaynta AIDS-ka Xeer Lr. 67/2014.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RL. 54
RECEIVED
12/01/2015

## Go'aanka Ansixinta Xeerka Guddida (Komishanka) Qaranka ee HIV-AIDS-ka

## Xeer Lr. 67/2014

**Markuu arkay:-** Qodobka 17aad Farqadiisa 1aad, 37aad iyo 38aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu arkay:-** xawliga uu ku faafayo cudur sidaha HIV ee mandaqadda Geeska Africa;

**Markay u caddaatay:-** khatarta dhabta ah ee dadka Somaliland ku wareegsan ee ka imanaysa faafidda HIV/AIDS;

**Markuu ogaadey:-** in loo baahanyahay dhismaha hay'ad Qaran oo u faradhuudhuubanka hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/AIDS-ka, dawaynta iyo daryeelka dadka xanuunka la nool, Wacyigalinta iyo baraarujinta bulshada JSL iyo la macaamilka ururada ku hawlan wax ka qabadka HIV/AIDS-ka;

**Markuu xaqiiqsannay:** Baahida sharci ee dhismaha (establishment) hay'adda qaran ee xakamaynta HIV-AIDS-ka.

**Markuu u Arkay:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:67/2014** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnaad **06/09/2014.**

**Markuu Arkey:-** Go'aanka Ansixinta Xeer LR:67/2014 ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhaysnaa **27/12/2014**

**Markuu Arkay:-** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samaynin kuna ansixiyeen afartan iyo sided **(48)** cod **xeerka Guddida (Komishanka) Qaranka ee HIV-AIDS-ka**

## WUXUU

Halkan kuugu soo gudbinayaa Xeerka Gudidda (komishanka) Qaranka ee Xakameynta HIV/AIDs **Xeer Lr. 67/2014**

**ALLAA MAHAD LEH**

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faarax
Gud Ku-xigeenka 1[aad] ee Golaha Wakiilada JSL.

GOLAHA WAKIILADA JAMHUURIYADA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

## XEERKA GUDDIDA (KOMISHANKA) QARANKA EE XAKAMAYNTA AIDS-KA

## XEER LR. 67/2014

December 2014

GOLAHA WAKIILADA ARKIFIYADA SOMALILAND

| | |
|---|---|
| **Markuu arkay:-** | Qodobka 17aad Farqadiis 1aad 37aad iyo 38aad ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| **Markuu arkay:-** | xawliga uu ku faafayo cudur sidaha HIV ee mandaqadda Geeska Africa; |
| **Markay u caddaatay:-** | khatarta dhabta ah ee dadka Somaliland ku wareegsan ee ka imanaysa faafidda HIV/AIDS. |
| **Markuu ogaadey:-** | in loo baahanyahay dhismaha hay'ad Qaran oo u faradhuudhuubanka hortagga iyo xakamaynta cudurka HIV/AIDS-ka, dawaynta iyo daryeelka dadka xanuunka la nool; Wacyigalinta iyo baraarujinta bulshada JSL iyo la macaamilka ururada ku hawlan wax ka qabadka HIV/AIDS-ka; |
| **Markuu xaqiiqsaday:-** | Baahida sharci ee dhismaha (establishment) hay'adda qaran ee xakamaynta HIV-AIDS-ka. |

# **Waxaa uu ansixiyay**

# Xeerka Gudidda ee Xakamaynta HIV-AIDS

# Xeer Lr. 67/2014

# CUTUBKA 1AAD
# MABAADII GUUD

## <u>Qodobka 1aad</u>
## <u>Erey-bixin</u>

Hadaan Xeerku si kale u sheegin:-

**Guddi (Komishan)**:- Waxaa loola jeeda Komishanka Qaranka ee HIV-AIDS-ka ee lagu aasaasay Xeerkan.

**Guddoomiye**: - Waxaa loola jeedaa Gudoomiyaha Gudida HIV-AIDS-ka.

**Agaasimaha Fulinta**:- Waa sarkaalka hoggaamiya Maamulka Gudida HIV/AIDs-ka.

**Habraacyo:**- Waa habraacyada kala duwan ee ay raacdo Gudidu sida ka Maamulka, xisaabaadka, shaqaalaha iyo kuwa kale ee la mid ka ah.

**Agaasinka Fulinta:-** Waxaa loola jeedaa agaasimayaasha uu Madaxweynuhu soo magacaabo.

## <u>Qodobka 2aad</u>
## <u>Magaca Xeerka</u>

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Asaasida Guddida (Komishanka) Qaran ee Xakamayta HIV/HIV-AIDS-ka.

## Qodobka 3aad
## <u>Astaamaha u Gaarka ah Hayada</u>

Guddidu (Komishanku) waxay yeelanaysaa astaan u gaar ah oo ah (Khariidadda Somaliland oo uu ka dhex talowsanyahay Qool cas oo astaan u ah AIDS-ka, didabka khariidadda Somaliland waa cagaar waxaana Ku xeeran midab cadaan ah, Qoolka iyo cadaanka waxaa ku dul wareegsan laba goobaabood oo kala sarreeya oo dhexdooda uu marsanyahay midab cagaarani, dhinaca sare ee midabka cagaaran waxaa min bidix ilaa Midig Ku qoran: **"Guddida (Komishanka) Qaranka ee HIV-AIDS-ka",** Dhinaca hoose ee diillinta cagaaran meel badhtamaha hoose ah waxay ku dul fadhiyaan barkin leh midab buluugga oo ay Ku dhex qorantay (**SOLNAC**)/<u>Waxaana awood u leh waxka bedelkeeda Guddida.</u>

**Qodobka 4aad**

**Aasaasidda Guddida (Komishanka) Qaranka ee HIV-AIDS-ka iyo Astaantiisa**

1. Xeerkan waxaa lagu Aasaasay Gudiga Qaran ee Xakamaynta HIV/AIDS oo ah Hay'ad qaran oo leh qofnimo qaanuuneed iyo shaambad u gaar ah, una madaxbannaan maamul ahaan iyo dhaqaale ahaanba.
2. Xarunta Guddidu waa caasimadda JSL ee Hargeisa xafiisyana way ka furan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka.

**Qodobka 5aad**

**Ujeeddooyinka Komishanka Qaranka ee AIDS-ka.**

**1-** Dejinta siyaasaddaha iyo hagayaasha lagaga jawaabayo fiditaanka cudursidaha/cudurka HIV/AIDS iyo hab-maamulka cawaaqibkiisa ee dalka JSL.

**2-** Qaabaynta Istaraatiijiyad guud oo heer Qaran oo dhinacyo badan kuna wajahan ka hortagga xakamaynta HIV/AIDS iyo daryeelka, ilaalinta dadka la nool HIV/AIDS.

**3-** Diyaarinta qorshaha, qaab-shaqeedka dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha ka hortagga, xakamayn HIV/AIDS, daawaynta, daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda dadka la nool HIV/AIDS ee hoos-yimaada istaraatiijadda faqrada 2aad ee qodobkan.

## CUTUBKA LABAAD
## QAAB-DHISMEEDKA KOMISHANKA

**Qodobka 6aad**

**Qaab-dhismeedka Komishanka Qaranka ee HIV/AIDS-ka:**

Komishanka Qaranka ee Xakamaynta AISDS-ku wuxuu ka kooban yahay:

1. Heer Qaran:-
   b) Golaha Hagidda, iyo
   t) Agaasinka Fulinta

2. Heer Gobol:-
   b) Golaha kormeerka, iyo
   t) Xafiiska xidhiidhinta hawlaha HIV/AIDS ee Gobolka

3. Heer Degmo:-
   b) Unugga kormeerka, iyo
   t) Xafiiska xidhiidhinta HIV/AIDS ka ee Degmada

## Qodobka 7aad
## Aaasaasida Golaha Hagidda ee Komishanka

I. Golaha hagiddu wuxuu ka koban yahay todobada xubnood ee kala ah
  b) Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.
  t) Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada.
  j) Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta.
  x) Wasiirka Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha.
  kh)Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
  d) Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
  r) Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda.

II. Agaasimaha fulinta ayaa ah Xoghayaha Golaha Haggidda, waxaanu ugu xilsaaran yahay diyaarinta shirarka iyo qaadista hadal-qoraalada.

## Qodobka 8aad
## Dhismaha Agaasinka Fulinta

1) Agaasinka fulinta wuxuu ka koobnaan karaa:-
  b) Agaasimaha fulinta
  t) Agaasimaha daaweynta iyo daryeelka
  j) Agaasimaha maamulka iyo lacagta,
  x) Agaasimaha wacyi-gelinta iyo abaabulka,
  Kh) Agaasimaha tababarada iyo horumarinta hawl-wadeenada
  d) Agaasime waaxeedka kale ee loo baahdo.

2) Agaasinka fulintu go'aamadooda wuxuu gaadhayaa wada tashi
3) Madaxweynaha ayaa leh awoodda wax-ka-bedelka iyo dhismaha xafiiska agaasinka fulinta.

## Qodobka 9aad
## Dhismaha Golaha Iskuduwidda iyo Unugga Kormeerka

1. Golaha iskuduwidda ee Gobolku wuxuu ka kooban yahay iskuduwayaasha wasaaradaha uu ka kooban yahay golaha hagiddu.

2. Unugga kormeerka ee degmadu wuxuu ka kooban yahay madaxda heer degmo ee wasaaradaha uu ka kooban yahay golaha hagiddu ama cidda wasaaradahaas uga wakiil ah degmada.

## Qodobka 10aad
## Xilka iyo Waajibaadka Golaha Hagidda

Golaha Hagidda ee komishanku wuxuu u xilsaaran yahay:

1. Ansaxinta xeer-hoosaadka iyo hab-raacyada Agaasinka Fulinta iyo xafiisyada hoos yimaadda.

2. Dhegeysiga warbixinaha Agaasimaha Fulinta.
3. Dabagalka, ka-war-haynta iyo la-socodka hawlaha agaasinka fulinta.
4. Talo-siinta agaasinka fulinta iyo toosinta dhaliishiisa.
5. Abaabulka iyo raadinta dhaqaalaha lagu meel-marinayo qorshayaasha iyo barnaamijyada lagaga hortagayo laguna xakamaynayo HIV/AIDS.
6. Ka gacan-siinta agaasinka fulinta caqabadaha soo food-saara.
7. Baadhista iyo go'aan ka gaadhista khilaafyada maamul ee soo kala dhex-gala masuuliyiinta agaasinka fulinta ama agaasinka fulinta iyo dhinacyada uu xidhiidh la leeyahay.
8. Arrimaha kale ee agaasinka fulintu ka codsado in ay ka gacan-siiyaan.

## Qodobka 11aad
## Guddoomiyaha Komishanka.

Madaxweynaha ayaa ah Gudoomiyaha Komishanka, waxaana socodsiinta hawlaha uga wakiil ah AgaasinkaFulinta.

## Qodobka 12aad
## Xilka iyo waajibaadka & Masuuliyadaha Agaasimaha Fulinta

1. Agaasimaha fulintu wuxuu leeyahay xilka iyo waajibaadka hoos ku qoran:
   a) Socodsiinta hawl-maalmeedka komishanka.
   b) Diyaarinta qorshayaasha iyo barnaamijyada wax-qabad ee HIV/AIDS,
   c) Diyaarinta miisaaniyadda komishanka iyo xisaab-xidhka, marka uu u soo gudbiyo Agaasimaha Maamulka Lacagtu.
   d) Ansaxinta iyo hubinta isticmaalka dhaqaalaha loogu talo-galay hawlaha la xidhiidha HIV/AIDS.
   e) Raadinta iyo u hawl-gelidda dhaqaalaha lagu fuliyo qorshayaasha iyo barnaamijyada wax-qabad ee ku wajahan HIV/AIDS.
   f) Isku-duwidda hawlaha waaxyaha Agaasinka Fulinta iyo xidhiidhada gobolada iyo degmooyinka.
   g) Magacaabista xidhiidhiyaasha gobolada iyo degmooyinka marka uu la tashado xubnaha kale ee Guddida.
   h) Hawl-gelinta iyo la xisaabtanka hawl-wadeenada iyo shaqaalaha agaasinka fulinta iyo xafiisyada xidhiidhiyaasha gobolada iyo degmooyinka,
   i) Kaalmaysiga iyo adeegsiga la taliyaasha iyo xirfadlayaasha hadba inta loo baahdo.
   j) Ka qayb-galka shirarka caalamiga ah iyo kuwa gobolada ee la xidhiidha HIV/AIDS.
   k) Saxeexidda heshiisyada la xidhiidha HIV/AIDS,
   l) Abaabulka iyo isugu yeedhidda shirarka golaha hagidda, ka dib marka guddoomiyuhu ama wakiilkiisu marka aanay guddoomiyaha u suurto-geleyn ka qayb-galka shirku.

2. Marka uu maqan yahay Agaasimaha fulintu waxaa xilka ku sii simaya agaasimaha maamula iyo lacagta.

**Qodobka 13aad**
**Masuuliyadda Xidhiidhiyaha Hawlaha Komishanka ee Gobolka/Degmada**

1. Xidhiidhiyaha hawlaha komishanka ee gobolka ayaa gobol ahaan uga masuula ah agaasinka fulinta dhamaan hawlaha la xidhiidha ka hortagga iyo xakamaynta HIV/AIDS.
2. Xidhiidhiyaha hawlaha komishanka ee degmada ayaa uga wakiil ah xidhiidhiyaha hawlaha komishanka ee gobolka dhamaan hawlaha la xidhiidha ka hortagga iyo xakamaynta HIV/AIDS.

**Qodobka 14aad**
**Magacaabista Shuruudaha Agaasinka Fulinta iyo Agaasimayaasha Waaxyaha**

1- Aagasimaha fulinnta iyo agaasimayasha kale waxaa magaacabaya xilkana ka qaadaya madaxweynaha.

2- Qofka loo magacaabayo Agaasimaha Fulinta waa in uu yahay qof lagu yaqaan dhaqan suuban oo leh aqoon jaamacadeed iyo waayo-aragnimo aan ka yarayn shan sanno.

**Qodobka 15aad**
**Magacaabista iyo Xil-ka-qaadista Xidhiidhiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka**

1. Agaasimaha fulinta ayaa magacaabaya xilkana ka qaadi kara xidhiidhiyaaasha gobolka, marka uu la tashado xubnaha kale ee komishinka kuna waafaqaan".
2. Magacaabista iyo xil ka qaadista xidhiidhiyaasha hawlaha komishinka ee heer degmo waxaa soo jeedinaya xidhiidhiyasha heer gobol waxaana ogolaanaya aagasinka fulinta.

**Qodobka 16aad**
**Habka Shaqaalaynta iyo Shaqo-ka-saarista Shaqaalaha Komishanka Fulinta**

Habka shaqaalaynta iyo shaqo--ka-saarista shaqaalaha agaasinka fulinta iyo xafiisyada hoos yimaadda waxa loo raacayaa xeerka shaqaalaha dawladda.

**Qodobka 17aad**
**Shirarka Golaha Hagidda ee Komishanka**

Golaha Hagidda ee komishanku wuxuu yeelanayaa shir caadi ah oo qabsoomaya sannadkii laba jeer.

a) Shirarka caadiga ah:-
- Ugu yaraan todoba casho ka hor maalinta shirka, Agaasimaha Fulinta ahna xoghayaha golaha hagidda, ka dib markuu helo tilmaamaha guddoomiyaha ama wakiiladiisa wuxuu qoraal ku ogeysiinayaa dhamaan xubnaha golaha hagidda saacadaha, goobta iyo ajendaha shirka.

- Shirarka Golaha Hagidda waxaa guddoominaya guddoomiyaha komishanka haddii uu maqan yahayna waxaa guddoominaya Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.

b) Shirka aan caadi ahayn:-
- Golaha hagiddu waxa kale oo uu yeelan karaa shir aan caadi ahayn mar kasta oo loo baahdo, waxaana isugu yeedhi kara guddoomiyaha golaha ama wakiilkiisa,
- Xoghaya golaha fulintu, marka uu helo amarka guddoomiyaha komishanka ama wakiilkiisa, ee ah in la qabto shir aan caadi ahayn, wuxuu ku wargelinayaa xubnaha shirka aan caadiga ahayn goobta, taariikhda iyo ajendaha shirka

c) Shirka guddigu wuxuu ku qabsoomayaa marka ay joogaan ugu yaraan shan xubnood xubnaha golaha hagidda.

d) Golaha hagidda waxay go'aamadiisu ku ansaxayaan hal dheeri codadka xubnaha jooga.

e) Xoghayaha golaha hagiddu wuxuu shirka ka dhiiban karaa ra'yi iyo talo balse kuma laha cod.

## Qodobka 18aad
## Shirarka Golaha Iskudiwidda iyo Unugga Kormeerka

1. Shirka golaha isku-duwidda waxa guddoominaya guddoomiyaha gobolka, haddii uu maqan yahayna, isku-duwaha Wasaaradda Caafimaadka ee gobolka, oo uga wakiil ah guddoomiyaha gobolka socodsiinta hawsha komishanka ee gobolka.

2. Shirka golaha isku-duwidda waxa diyaarinaya xidhiidhiyaha komishanka ee gobolka, ka dib markuu la tashado guddoomiyaha golaha isku-duwidda ee gobolka ama wakiilkiisa (markuu guddoomiyuhu maqan yahay), isagaana shirka golaha isku-duwidda xoghayn ka ah.

3. Shirka unugga kormeerka waxa guddoominaya guddoomyaha degmada, haddii uu maqan yahayna waxaa guddoominaya madaxda waaxda caafiamadka ee degmada oo uga wakiil ah guddoomiyaha degmada socodsiinta hawlaha komishanka ee degmada.

4. Shirka unugga kormeerka waxa diyaarinaya xidhiidhiyaha hawlaha komishanka ee degmada, ka dib markuu la tashado guddoomiayaha unuga kormeerka degmada ama wakiilkiisa isaga ayaana shirka unuga kormeerka xoghaye ka ah.

**Qodobka 19aad**

**Xeer-hoosaadka iyo Hab-raacyada Komishanka**

1. Komishanku wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaad qeexaya:
    - Waaxyaha agaasinka fulinta uu ka kooban yahay iyo qaybaha ay waax waliba u sii kala baxayso,
    - Hawsha ay waax waliba u xilsaaran tahay,
    - Awoodaha iyo xilalka madaxda waaxyaha iyo degmooyinka,
    - Hawlaha xafiisyada gobolada iyo degmooyinka,
    - Xidhiidhka shaqo ee waaxyaha, qaybaha iyo xafiisyada heer gobol ama degmo ee komishanka,
    - Arrintii kale ee loo baahdo in xeer-nidaamiye laga soo saaro,

2. Maamulka komishanku wuxuu kaloo yeelanayaa hab-raacayo qeexaya
    - Habka maaliyadda iyo xisaabaadka,
    - Habka maamulka shaqaalaha
    - Habka xog-ururinta, keydinta, xafidaada iyo warbixinaha,
    - Arrintii kale ee loo baahdo in hab-raac gaar ah loo sameeyo,

3. Xeer-hoosaadka Xeernidaamiyayasha iyo habraacyadda ku xusan farqadda 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waxa diyaarinya agaasinka fulinta waxaaa ansixinaya Golaha Hagidda.

**Qodobka 20aad**

**Ilaha Dhaqaalaha Komishanka**

1. Komishanku wuxuu dhaqaalihiisa ka helayaa:'-
    - Xaddiga miisaaniyadda qaranka looga qoondeeyey,
    - Kaalmo kasta oo ay ka helaan xukuumadda, bulshada, ururada wadaniga ah, kuwa caalamiga ah, kuwa qaramada midoobay, ama dawlado, shakhsiyaad ama ururo shisheeye,
    - Dhaqaale kasta oo ka dhasha heshiis oo ku soo gala dariiq sharciga waafaqsa.

2. Nidaam-xisaabeedka komishanka wuxuu raacaya xeerka qaranka ee hab-xisaabeedka wasaaradda maaliyaddu u dhigtay iyo hab-xisaabeedka caalamiga ah.

3. Dhaqaalaha komishanka waxaa la xisaab-xidhayaa sannad kasta dhamaadkiisa.

4. Mar kasta oo loo baahdo, waxaa maaliyadda komishanka baadhis ku samayn kara hantidhawrka qaranka ama hantidhawr madax-bannaan.

**Qodobka 21aad**

**Warbixinaha Sannadlaha ah**

1. Agaasimaha fulintu wuxuu sannad kasta dhamaadkiisa soo saarayaa warbixin faah-faahsan oo uu u gudbinayo Golaha Hagidda.
2. Warbixinaha sannadlaha ah ee Agaasimaha Fulinta waxay xambaarsan tahay
   - Xaaladda guud ee dalka ee la xidhiidha HIV/AIDS.
   - Tallaabooyinka laga qaaday ka hortagga iyo xakamaynta HIV/AIDS.
   - Xaaladaha daryeel iyo ilaalineed ee dadka la nool HIV/AIDS,
   - Daraasadaha iyo cilmi-baadhista la sameeyay iyo natiijooyinka ka soo baxay.
   - Heerka fiditaanka cudur-sidaha HIV, cudurka AIDS ka (hoos u dhac iyo korodhka ku jira iyo sababaha kaalmeeynaya).
   - Caqabadaha ka hor yimid wax-qabadka, hortagga, xakamaynta cudursidaha/cudurka iyo daryeelka, daaweynta, xaannaayaynta iyo ilaalinta xuquuqda dadka la nool cudur sidaha/cudurka.
   - Talooyin la soo jeedinayo iyo macluumaad kasta oo lama huraan loo arko in la soo bandhigo.

**Qodobka 22aad**

**Daraasadaha iyo cilmi-baadhista**

Agaasimaha fulinta wuxuu samaynayaa daraasado iyo cilmi-baadhisyo joogto ah oo ku saabsan cawaaqibka, khatarta, ka hortagga, xakamaynta, daaweynta, heerka fiditaanka, heerka hoos u dhaca fiditaanka HIV/AIDS, goobaha u halis-badan, noocyada bulsho halista ugu badan ugu jira iyo weliba xaaladaha dadka la nool oo ay ka mid yihiin, heerarka takoorka, cuqdadda, daryeelka iyo ilaalinta xuquuqada.

**Qodobka 23aad**

**Wada shaqaynta laamaha**

Komishanka waxa uu wada shaqayn toos ah la yeelanayaa laamaha kale ee qaranka, ururada wadaniga ah, iyo beesha caalamka ee ku hawlan HIV/AIDS.

**Qodobka 24aad**

**Komishinka**

Dhamaan hawlaha komishanka waxa ay noqonayaan kuwo iyaga u gaar ah isla markaana hawl walbana waxa la gaadhsiinayaa cidda ay khuseyso oo keliya.

**Qodobka 25aad**

**Xeer-nidaamiyaha**

Golaha hagiddu wuxuu soo saarayaaa xeer-nidaamiyayaasha lagu faah-faahinayo laguna meel-marinayo xeerkan.

**Qodobka 26aad**
**Tirtirid**

Xeer kasta, qodob kasta oo xeer, xeer-nidaamiye kasta, wareegto kasta iyo amar kasta oo aan xeerkan dhaqan-geliskiisa la socon karin, waa la tirtiray,

**Qodobka 27aad**
**Dhaqangal**

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa Marka labada Gole?(Wakiilada iyo Guurtidu) Ansixiyaan Madawxeynuhuna Saxiixo isl Markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Ku simaha Gudoomiyaha ahna**
**Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee G/Wakiilada JSL**